



## Maxaa loo baahan yahay inaan ka ogado TB?

## Somali: TB Awareness

## Waa maxay qaaxada (TB)?

TB waa cudur sababo bakteeriyo hawada ku faafo. Wuxuu sababi karaa dhiibaato caafimaad aad u xun – gaar ahaan haddii mar horey la daaweyn. Laakiin TB'da waa la daaweyn karaa, iyo baaritaanka iyo daaweynta waa bilaash iyo qarsoodi.

TB wuxuu saamayn ku lahaan karaa qayb walba ee jirka. Laakiin TB'da dhuunta iyo sambabta galo ayaa ah noocyada cudurka faafiyoo, kaasoo loola jeedo in loo gudbin karo dad kale.

TB WAA CUDUR LA DAAWEYN KARO IYO  
DAAWADA SI BILAASH IYO QARSOON AYAA  
QOF WALBA LOO SIIN KARAA

## Sidee lagu qaada TB?

Markii qof qaba TB'da faafa uu qufaco ama hindhisoo, waxay hawada raacsiiin karaan dhibco ku jiro bakteeriyyada. Adigana waxaad u baahan tahay inaad qiyaas badan ee dhibcahaan neefsato si aad u qaado TB. Sidaa awgeeda waxaad ku jirtaa halis ka wayn inaad qaado TB haddii aad qof qabo TB'da faafo waqtii badan la joogto ama la noosahay.

Qaar ka mid ah dadka waxay TB ku xanuunsadaan isla markiiba ay neefsadaan bakteeriyyada. Dadka kalena bakteeriyyada jirkooda ayuu isku qariya, mana ku xanuunsadaan. Kani waxaa lagu magacaaba TB'da qarsoon. Laakiin TB'da qarsoon wxuxuu isku beddeli karaa mid 'firfircoon', marmar dhowr sanadoo ka dib, iyo waad ku xanuunsan kartaa. Kani wuxuu badanaa dhici karaa markii jirro ama walwal diciifiyo nidaamka difaaca jirka.

## Calaamadaha:

- qufac socdo 3 usbuuc
  - miisaanka oo hoos u dhaco
  - xummad
  - dhididka habeenka
  - daal ama tabar la'aan
  - qaajo la'aan.

CALAAMADAHA TB WAXAY KUGU SOO  
BIXI KARAAN SI TARTIIB AH, WAXAANA  
SUURTOGAL AH IN DHAMMANTOODA HAL  
MAR SOO WADA BIXIN. MAR WALBA U TAG  
TAKHTAR HADDII AA WELWELSAN TAHAY.

## Qofkee uu badan tahay inuu ku dhaco TB?

Qof walba ayuu ku dhici karaa TB, laakiin qaar ka mid ah dadka waxay ku jiran halis ka badan markii dad kale loo bar bardhigo. Wuxaan ku jirtaa halis ka badan inaad TB qaado haddii:

- ku dhalatey ama xiriir la leedahay Koonfuurta-Sahara ee Afrika, Koonfuur-bariga Aasiya, Qaybo ka mid ah Yurub ama dalal kale uu TB ku badan yahay.
  - guri-laawe tahay ama ku nooshahay guri buux-dhaaf ah ama hawo yar leh.
  - u caadeysatey daroogo ama khamri.
  - nidaamka difaaca jirkaaga uu daciiif yahay, cudurka HIV awgeeda ama cuduro kale.

## Tallaabo sidee ayaan qaada?

Haddii aad ka welwelsan tahay inaad TB qabtid ama inaad neefsatey bakteeriyyada TB, la hadal takhtar sida ugu dhaqsi badan.

Haddii si deg deg ah laguu daaweyo, waxaa yeraanaayo suurtogalmimada inaad si xun u xanuunsato ama dad kale ku faafiso TB.

Haddii aad qabtid TB, waxaa lagu siin doonaa daawo antibiyootiko si loo daaweyyo TB. Kaaliye caafimaad u takhasuusan TB ayaa kugu taageereyso daaweynta.

## Iloyin macluumaaad iyo taageero

*Taageerida iyo talada loogu talagalay  
dadka ka wel-welsan TB*

TB Alert

Telefoon: 01273 234029

Email: info@tblert.org

[www.thetruthabouttb.org](http://www.thetruthabouttb.org)

[www.tbalert.org](http://www.tbalert.org)

MacLuumaad